**XAFIISKA QARAMADDA MIDDOBAY U QAALIBLSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)**

Warsaxaafadeed degdeg ah

**WAR-SAXAAFADEED 09/2013**

## Ergaygga Gaarka ah ee Xoghayaha-Guud ee Qaramadda Middobay u Qaabilsan Soomaaliya, Nikolas Kay, oo ka hadlaya Heshiiska Jubba ee lagu saxiixay Addis Ababa

**Muqdishu/Addis Ababa, 28 Agoosto 2013 –** Ergaygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qarammadda Middobay u Qaabilsan Soomaaliya, Nikolas Kay, ayaa maanta soo dhoweeye Heshiiska ay ku saxiixeen Addis Ababa,Wasiiru Dowhaha Madaxtooyadda, Mudane Farax Sheikh Cabdulqadir iyo Sheikh Axmed Maxamed Islan " Madobe", kuwaas oo ka wakiil ahaa Dowladda Federaalka Soomaaliyeed iyo Maamulka ku Meelgaarka ah ee Jubba. Ethiopia oo aheed Goddomiyaha Ururka IGAD ayaa saxiixday heshiiska- Damaanad-qaad- ahaan- guarantor. Heshiiska wuxuu salka u dhigayaa habka maamul iyo isxukun ee ka jiraya Jubbada Hoose, Jubbada Dhexe, iyo Gedo mudada soo socota.

"Tani waa talaabo muhiim ah ee loo qaaday dhinaca nabad kusoo dabaalidda Soomaaliya, dhismaha dowlad adag ee kusalaysan nadaamka federaalka ah, taasoo horumarinaysa amaanka wadamada Gobalka iyo tan caalamkuba", ayuu yiri Ergaygga Gaarka ah ee Kay. "Heshiiskan waxa uu albaabada u furayaa in ay Umadda Soomaaliyeed yeelato mustaqbal wanaagsan".

Mudane Kay waxa kale ee uu amaanay doorka madaalenimada leha ee Ururka IGAD iyo Gudoomiyahiisa ee xiligaan, Dr. Tedros Adhanom Ghebreyesus, oo ah Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Itoobia, ayka ciyaareen sidii dhinacyada ay ugaari lahayeen heshiiskaan.

Ergaygga Gaarka wuxuu amaanay dowrka IGAD , si gaar ahna waxa uu u amaanay Itoobiya, iyo Wasiirkeeda Arrimaha Dibedda, Dr. Tedros Adhanom Ghebreysus kaas oo ahaa Guddoomiyaha Golaha Wasiiradda IGAD. Dadaalaka aan hagrashada laheen ee la muujiyay ayaa ka kaalmeeyay dhinacyadda in ay geeraan Heshiiskan. Waxaa kale oo muhiim ahaa Aragtida Qarannimada ku fadhiday ee uu muujiyay Madax-wayne Xasan Sheikh Maxamuud, iyo Geesinimadda Axmed Madoobe.

Sidoo kale, Ergaygga waxa uu amaanay Dowrka taageero ee uu muujiyay Raiisul Wasaarae, Cabdi Farax Shirdoon.

Asagoo oogu hambalyeynayo Axmed Madoobe hogaanka uu ka qabanayo Maamulka ku- meelgaarka ah ee Jubba, Ergaygga Gaarka ah waxa uu yiri: "hogaaminta waxaa lasocota ama ay xambaarsantahay masuuliyad. Dadka Reer Jubba, iyo Soomaali oo dhan waxay eegayaan maamulka cusub ee ku meelgaarka ah sida uu u dhalin lahaa nabadda, iyo amaanka, uguna adeegi lahaa bulshadda. Heshiiskani waa mid kumeelgaar ah, wuxuuna siinayaa maamulka fursadii uu dadka oogu adeegi lahaa, taas oo ay kamid tahay abuuritaanka fursadii ay dib oogu soo noqan lahaayeen dadkii ka bara kacay magaaladda Kismaaayo dagaaladii dhowaa awgood iyo in uu joojiyo dhuxusha sida sharci daradda ah looga dhoofinayo deegaanka".

"Heshiiskan waxaa ka faaidaysanaya dhamaan dhinacyadda oo dhan. Waxaan oogu baaqayaa dadka oo dhan in ay heshiiskan u hirgeliyaan si ay ku jirto niyad wanaag. Talaabo kasta oo wax loogu dhimayo heshiiskan waxay caqabad ku noqonaysaa dadaalka ay wadaan dadka Soomaaliyeed iyo kan bulshadda caalamka ay ku taageerayo nabadda iyo xasiloonidda." "Si hoos ayaan ula soconayaa hirgelinta heshiiskan, ayuu yiri Ergaygga. Waxaan u rajaynayaa Axmad Madoobe iyo Maamulka cusuba in ay guulaystaan".

UNSOM waxaa loo xilsaaray in ay taageerto habka nabad sameenta iyo qaran dhiska,iyo in ay taageerto dadaalka Dowladda eek u aadan nabadeynta iyo xasalinta- dalka. Dowladda Soomaaliyeed iyo IGADba waxay ku baaqeen in laqaban doono shir dib u heshiisiin Soomaliyeed, kaas oo ka dambaynayo shirkan. UNSOM na waxay taageeri doontaa shirkaas. UNSOM waxay xafiis kafuran doontaa Kismayo si ay u taageerto maamulka cusub iyo dadaaladiisaba.

"Heshiiskan wuxuu u ogolaanayaa dadka iyo masuuliyiinta Soomaaliyeed in ay xoogooda saaraan arrimaaha muhiimka leh, sida: Nabadda iyo Amnigga, habka Shaqo Abuurista, Waxbarashada, Caafimaadka, iyo dib-udhiska Soomaalidda cusub, taas oo ku salaysan: is xurmeen, sharci iyo kaladanben iyo dib u heshiisiin, ayuu yir Ergaygga Gaarka ah'.

Dhammaad.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta
Anne Mugisha Bwomezi • Tel: +254 41 350 6729 • Email: unsom-spokesperson@un.org
**Fadlan eeg rugta Internet-ka:**
**www.unsom.unmissions.org**
**@UNSomalia facebook.com/UNSOMALIA**